



**TILMAAME LOOGU TALOGALAY
WAALIDIINTA BARTEYAASHA LUUQADDA
INGIRIISKA EE GOBOLKA NEW YORK**

Gacaliye Waalid/Mas'uul,

Xafiiska Waxbarashada Labada Luuqadood iyo Luuqadaha Caalamka ee ku yaala Waaxda Waxbarashada Gobolka New York wuxuu ku dadaalayaa in uu siiyo ardayda ay luuqadahooda guriga yihiin luuqado aan ahayn Af Ingiriis helitaanka waxbarasho sinnaan leh oo heer sare ah. Haddii luuqadda guriga ee ilmahaaga ay tahay luuqad aan ahayn Af Ingiriis iyo in asaga ama iyadana ay baranayaan, ama ay ku socdaan jidka ay ku baranayaan Ingiriis, ilmahaaga waa laba luuqadle. Hambalyo! Carruurta laba luuqadleyasha ah waxay leeyihin qiime gaar ah iyo faa'iidooyin waxaana ka horreeyo fursado badan. Waaxda Waxbarashada Gobolka New York waxay si adag u qiimeynaysaa laba luuqadlenimada waxayna ku dadaalaysaa in ay siiso gundhiga ugu fiican ilmahaaga si loo horumariyo awoodeeda ama awoodeeda luuqadeed ee dhammeystiran.

Waxaan kugu martqaadeynaa in aad wax ka oggaato barnamijyada waxbarasho ee loo heli karo ardayda dhowaan la qorey ee leh luuqado aasaasi ah ama guriga oo aan ahayn Ingiriis kuwaas oo u baahan taageerada gaaridda si fiican u aqoonista luuqadda Ingiriiska. Ardaydan waxaa loogu yeeraa Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska (ELLS) ama Barteyaasha Luuqadaha Badan (MLLs). Waxaan aqoonsanahay in ardaydan aysan kaliya horumarinayn xirfadaha Ingiriiska balse ay noqonayaan laba akhris-qoraal yaqaan ama, xaaladaha qaar, carruur luuqado badan yaqaana.

Iyada oo in ka badan 200 luuqadood luugu hadlo gudaha xudduudiisa, Gobolka New York waa mid ka mid ah meelaha ugu badan oo ay ka jiraan dhaqanno iyo luuqado kala duwan ee caalamka. Aqoonista in ka badan hal luuqad waxay ka mid tahay qiimeyaasha ugu badan ee ardaydeenna. Sidaa darteed, barnamijyada waxbarasho ee ELL-yada ee ka jira guud ahaan Gobolka New York waxay ujeeddadoodu tahay in loo isticmaalo luuqadda guriga ama aasaasiga ah sida khayraad lagu xaqiijinayo in dhammaan ardayda ay awoodaan in ay tacliin ahaan ku horreeyaan.

Tilmaamahan, waxaad ka helaysaa maclumaad ku saabsan sida carruurta loogu aqoonsado sida ELL-yo, noocyada barnamijyada loo heli karo ELL-yada, marka ay ardaydu ka baxayaan barnamijyada ELL iyo adeegyada, iyo sida aad uga heli karto maclumaad dheeraad ah, agabyo, iyo kharyaad dugsiyada degaanka.

Waxaan aaminsanahay waalidiinta iyo qoysaska in ay ka qaataan kaalin aasaasi ah go'aaminta barnamijka sida ugu fiican uga hadla baahiyada bulsho, dhaqan, iyo midda tacliimeed ee carruurtooda. Waxaan ku faraxsnahay in aan kula shaqeyna waxaana rajeynaynaa in aan kaala shaqeyno bilowga ilaa dhammaadka geeddi-socodkan.

Waxaan kuu baryaynaa sannad dugsiyeed guul badan, farsaxad iyo caafimaad qab leh!

Daacadnimo,



Angelica Infante-Green

Associate Commissioner of Bilingual Education and World Languages
The Office of Bilingual Education and World Languages
New York State Education Department

TUSMADA BUUGGA

Su'aalaha Inta Badan La Is Wayddiiyo ee Ku Saabsan Ingiriiska

Barteyaasha Luuqadda (ELLS)

Bogga 1

Barnaamijyada Diirrada La Saaro

Bogga 2

Waxbarashada labada Luuqadood

- Barnaamijyada Waxbarashada Labada-Luuqadood**

ee ku Meelgaarka ah

Bogga 2

- Barnaamijyada Labada Luuqadood ee Halka ama**

Labada-dhinac

Bogga 2

Barnaamijyada Ingiriiska sida Luuqad Cusub Ahaan

Bogga 3

QuraafAADka ku saabsan Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska iyo

Barteyaasha Luuqadaha Badan

Bogga 5

Miyaad Ogeyd? Xaqiqooyinka ku saabsan Laba-luuqadlenimada iyo

Waxbarashada Labada Luuqadood

Bogga 7

Ka-qaybgalka Waxbarashada Ilmahaaga

Bogga 9

Khayraadka loogu talogalay Waalidiinta ee ELL-yada

Bogga 10



SU'AALAH INTA BADAN LA IS WAYDDIYO EE KU SAAABSAN BARTEYAASHA LUUQADDA INGIRIISKA (ELLs)/BARTeyaasha Luuqadaha Badan (MLLs)

Sidee ilmahegya loogu aqoonsadaa sida Bartaha Luuqadda Ingiriiska (ELL)/Bartaha Luuqadaha Badan (MLL)?

Gobolka New York State, dhammaan ardayda dhowaan la qoray iyo kuwa dib isu qoraya labo sano ka dib waxaa laga doonayaa in ay dhammeystiraan Xogururinta Luuqadda Guriga (HLQ). HLQ waa in la sameeyo waqtiga is-qoritaanka.

Inta lagu guda jiro sahankan, oo raacsan wareysi aan rasmi ahayn, macalin aqoon u leh ama xubin kale oo shaqaalah ka tirsan oo xirfadle ah ayaa oggaan doonaa luuqadaha lagu adeegsado guriga. Haddii sahanka iyo wareysiga ay tilmaamaan in luuqad aan ahayn Ingiriis in guriga lagu adeegsado, ilmahaaga waa in uu qaato imtixaanka si fiican u aqoonista luuqadda Ingiriiska ee loo yaqaano Imtixaanka Aqoonsiga Gobolka New York ee loogu talogalay Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska (NYSITELL).

Natijjooyinka NYSITELL ka dib waxaa loo adeegsadaa in lagu qiimeeyo heerka luuqadda Ingiriiska ee Ilmahaaga (Gelitaan, Ka-sookicid, Isbeddelaya, Balballaaran, iyo Horreyya). Haddii ilmahaaga uu keeno Gelitaan (Bilow), Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe), Isbeddelaya (Dhexe), ama Balballaaran (Horumarsan), asaga ama iyada waxaa loo aqoonsadaa sida ELL. ELL-yada waxay xaq u leeyihii in ay helaan Adeegyada Waxbarashada Labada-luuqadood (BE) ama Ingiriiska sida Luuqad Cusub Ahaan (ENL). Haddii ardayga uu keeno heerka Horreyya (Aqoon Sare u Leh) asaga ama iyada looma aqoonsado sida ELL ahaan.

Natijjooyinka NYSITELL waxay ku caawinayaan macalamiinta in ay si fiican ugu diyaariyaan oo ugu adeegsan ardaydooda. Macalamiinta waxay u isticmaalaan macluumaadkan in ay ku aqoonsadaan xooggaa luuqadda Ingiriiska ee ardayga iyo baahiyada dhageysiga, hadalka, akhrinta, iyo qoraalka. Natijjooyinkan waxay sidoo kale ku hagaan dugsiga dejinta barnaamijka tirada daqiqadaha ugu yar waxbaridda Ingiriiska Luuqad Cusub Ahaan (ENL) toddobaad kasta ee ardayda.

Geeddi-socodka aqoonsiga waa in la sameeyo ka hor bilowga sannad dugsiyeedka ama waqtii aan ka dambeyn tobanka maalmood ee ugu horeeya gudahooda ee qoritaanka ardayga.

Heerka	Sharaxaadda Heerka Si Fiican U Aqoonida Luuqadda Ingiriiska
Gelitaanka (Bilow)	Ardayga heerka Gelitaanka wuxuu aad ugu tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada (goobo) tacliineed ee kala duwan.
Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)	Ardayga heerka Ka-sookicidda wuxuu xoogaa ku tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.
Isbeddelaya (Dhexe)	Ardayga heerka Isbeddelaya wuxuu ka muujinayaa xoogaa madax-bannaani ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta, balse wali kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.
Balballaarin (Horumarsan)	Ardayga heerka Balballaarin wuxuu ka muujinayaa madax-bannaani badan ee ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta wuxuuna ku dhow yahay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.
Horreyya (Aqoon Sare u Leh)	Ardayga heerka Horreyya wuxuu ka soo baxay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan. Asaga ama iyada ma ahan ELL.

SU'AALAH INTA BADAN LA IS WAYDDIIYO EE KU SAABSAN

ELLs/MLLs (socota)

Barnaamijyada Diirrade La Saaro

Waa maxay barnaamijyada loo heli karo Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska?

Hadda la joogo, Gobolka New York wuxuu bixiyaa laba moodooyin (qaabab) barnaamij oo la oggolaadey ee loogu talogalay ELL-yada degmooyinka dugsiyada ee gobolka:

1. Waxbarashada Labada luuqadood
 - Barnaamijka Waxbarashada Labada Luuqadood ee Ku Meelgaarka ah (TBE)
 - Barnaamijka Labada Luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac OWDL/TWDL)
2. Barnaamijka Ingiriiska sida Luuqad Cusub Ahaan (ENL) (horeyna loo oron jirey Ingiriiska sida Luuqada Labaad ahaan ama ESL)

Labada moodo ee barnaamijka waxay taageeraan guusha tacliineed ee ELL-yada, balse waqtiga waxbarista ee lagu qaatey luuqadda guriga ama aasaasiga ah iyo Ingiriiska waxay ku kala duwan yihiin moodo kasta. Qoysaka waxay xulan karaan in carruurtooda ay ka qaybgalaan Waxbarashada Labada Luuqadood ee Ku Meelgaarka ah, Labada Luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac, ama Barnaamijka Ingiriiska sida Luuqad Cusub ahaan. Haddii barnaamijyadan aanan laga helin dugsiga degaanka, waxaad codsan kartaa beddelaadda dugsi bixiya barnaamijkaaga xulashada. ELL-yada ku jira barnaamijyada Waxbarashada Labada-luuqadood ee Ku Meelgaarka ah ama Labada Luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac waxaa ku waajib ah in ay helaan qaddar cutubyo gaar ah oo isku mid ah ee ah waxbarista ENL sida ardayda moodada ENL. Ugu yaraan, ELL-yada waxaa ku waajiba in ay helaan waxbarista ENL. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah, booqo:

<http://www.p12.nysesd.gov/biling/docs/Nowithdrawaloptionmemo.pdf>

Waxbarashada Labada Luuqadood

Waxbarashada Labada Luuqadood ee Ku Meelgaarka ah

Barnaamijyada Waxbarashada Labada Luuqadood ee Ku Meelgaarka ah waxay siyaan ardayda isku luuqadda guriga/aasaasiga ah fursadda ay ku baranayaan in ay ku hadlaan, fahmaan, akhiryaan, iyo in ay qoraan Ingiriiska iyada oo sii-wada in ay bartaan maadooyinka tacliimeed (cilmiga gaarka ah) ee luuqadooda guriga/aasaasiga ah. Luuqadda guriga/aasaasiga ah ee ardayda waxaa loo adeegsadaa in ay ku caawiso in ay tacliin ahaan ugu horumaraan dhammaan maadooyinka (cilmiga gaarka ah) inta ay baranayaan Ingiriiska. Yoolka Barnaamijka TBE waa in uu siyo ardayda fursadda ay ugu gudbayaan gundhiga fasalka halka luuqad ee Ingiriiska ah iyada oo aysan jirin taageero dheeraad ah marka ay gaaraan si fiican u aqoonista. Inkasta oo qaddarka waxbarsita Ingiriiska ee ay ardayda helaan way kordhaysaa muddo ka dib, barnaamijka TBE, waxaa had iyo jeer jiraya waxbaris luuqadda guriga/aasaasiga ah iyo taageero, oo u oggolaanaysa ardayda fursadda ay ugu horumarayaan laba luuqadle ahaan.

Barnaamijyada Labada luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac

Barnaamijyadan waxaa loo qaabeeyay in ay ku caawiyaan ku hadlayaan Ingiriiska u dhasha ama kuwa aan u dhashan in ay ku guulaystaan laba luuqadlenimada (awoodda loogu hadlaysi si waadax ah laba luuqadood), laba akhris-qoraal yaqaanid (awoodda lagu qoraya ama lagu akhrinayo laba luuqadood), awoodda xirfadeed ee dhaqamada kala duwan, iyo si fiican u aqoonis tacliimeed ee la mid ah midda ardayda ku jirta barnaamijyada aan ELL ahayn.

Barnaamijka Labada Luuqadood ee Halka-Dhinac wuxuu aasaasi ahaan ka kooban yahay arday ka yimid luuqad aasaasi/guri isku mid ah iyo/ama asal isku mid ah. Macalinka wuxuu ku bixiyaa waxbarista labadaba Ingiriis iyo luuqadda guriga/la beegsanayo*.

Barnaamijka Labada Luuqadood ee Labada-Dhinac waxaa ka mid ah labaduba ku hadleyaasha Ingiriiska dhaladka iyo ELL-yada. Macalinka ama macalamiinta waxay waxbarista ku bixinayaan labaduba Ingiriis iyo luuqadda aasaasiga/guriga iyo inta kale ee ka harsan waxbaristooda luuqadda ay beegsadaan. Iyada oo ku xiran moodada, boqolleyda waxbarista Ingiriiska iyo luuqadda guriga/la beegsanayo way kala duwanaanayaan. Tusaale ahaan, moodada 90%-10%, boqolley badan ee waxbarista waa luuqadda la beegsanayo oo aan ahayn Ingiriiska wayna kordhaysaa muddo ka dib illaa laga gaaro 50%-50%. Yoolka barnaamijyadan waa in ardayda ay ku horumaraan akhris-qoraalka iyo si fiican u aqoonista ee Ingiriiska iyo luuqadda guriga/la beegsanayo.

* Luuqadda la beegsado waa luuqadda labaad ee la bartey/la kasbadey.

SU'AALAH INTA BADAN LA IS WAYDDIYO EE KU SAABSAN BARTEYAASHA

LUUQADDA INGIRIISKA (ELLs) (socota)

Ilmaheyga ma baran doonaa Ingiriis haddii asaga ama iyada ay in badan adeegsanayaan luuqadda guriga?

Walaaca guud waa in ardayda ay noqon doonaan kuwo wareersan marka ay wax ku baranayaan laba luuqadood. Cilmibaaris la sameeyay in ka badan 30 sano waxay si soo noqnoqota u muujisay in aysan jirin jahwareer luuqadeed. Xaqiiqdii, isticmaalidda luuqadda guriga/aasaasiga ah waa habka ugu fiican ee asaga ama iyada ay ku horumarinayaan Ingiriiska. Waxaa siidheer, barteyaasha labada luuqadood waxay yeeshaan maskax isbedesha iyo xirfado garasho kala duwan ee ku caawiya in ay wax u bartaan siyaabo awood badan. Barnaamijyada Labada Luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac, luuqadda waxbarista waa kala gooni, oo macnaheedu tahay in ardaydu ay leeyihii waqtayo gaar ah ama maalmo loogu talogalay luuqad gaar ah. Marka ay waalidiintu ay soo boqdaan barnaamijyadan, waxay arkaan in gundhigan uusan ahayn jahwareer balse dhab ahaantii ku habboon horumarinta laba luuqadlenimada ee ardayda. Cilmibaaris ayaa muujisay in da'da tobani, carruurta Barnaamijyada Labada Luuqadood ee Halka ama Labada-Dhinac ay keeni karaan waxa ay keenaan Kuwa ku hadla halka luuqad ee ingiriiska ama wax ka badan.

Waa maxay noocyada casharka ama hawlaha aan filanayo in aan ku arko Barnaamijka Labada luuqadood?

Ardayda waxay ku helaan qayb ka mid ah waxbaristooda Ingiriis qaybna luuqadda guriga/aasaasiga, balse manhajka wuxuu la mid yahay kan aan ahayn labada luuqadood. Ardayda waxay horumarinayaan akhris-qoraalka iyo aqoonta maadada xisaabta, sayniska, fanka luuqadda, iyo cilmiga bulshada ee labada luuqadoodba iyada oo ku xiran moodada barnaamijka. Xirfadaga hal luuqad waxay u wareegayaan luuqadda labaad. Marka ardayga uu leeyahay xirfadaha akhris-qoraalka oo adag ee luuqadda guriga/aasaasiga ah, xirfadahaasi waxay u wareegaan luuqadda labaad.

Barnaamijyada Ingiriiska Sida Luuqad Cusub Ahaan

Waxbarista barnaamijkan, ee hore loo oran jiray Ingiriiska Sida Luuqad Labaad ahaan (ESL), waxay xoogga saareysaa barashada luuqadda Ingiriiska. Barnaamijka ENL, waxbarista fanka luuqadaha iyo maadooyinka waxaa lagu baraa Ingiriis iyada oo la adeegsanayo istiraatiijiyadaha waxbarista ENL. Fasalada maadooyinka qaar waxaa lagu Dhexdaraa fasalada ENL. Ardayda waxay qaadanayaan waxbarista maadooyinka muhiimka ah iyo horumarinta luuqadda Ingiriiska, oo ay ka mid yihiin isticmaalka luuqadda guriga/aasaasiga ah sida taageero iyada oo waxbarista ELL ee habboon ay taageerayso kobcinta fahamka. Fasallada ENL ee Iskudhafka ah waxaa bara macalin labaduba aqoon u leh maadooyinka iyo ENL ama ay waxbarista wadaagaan macalin aqoon u leh maadooyinka iyo macalin aqoon u leh ENL. Fasalka ENL ee kaligii taagan, ardayda waxay helaan waxbarista horumarinta luuqadda Ingiriiska ee uu baro macalin Ingiriiska ee aqoon u leh NYS ee ardayda ku hadasha Luuqadaha Kale (ESOL) si loo helo luuqadda Ingiriiska loogu baahan yahay guusha maadooyinka. Barnaamijkan sida caadiga ah wuxuu u adeegayaa ardayda ELL ee ka socda asal luuqadda guriga /aasaasiga ah ee luuqadooda caadiga ah ay tahay Ingiriis sidaa awgeed kama qaybgali karaan barnaamij laba luuqadood.

Waa maxay farqiyyada u dhaxeeyaa barnaamijyadan?

Barnaamijyada Labada Luuqadood waxay adeegsadaan waxbarista ee labada luuqadood waxayna ujeeddadoodu yihiin horumarinta laba akhris-qoraal iyo laba luuqadlenimo. Yoolalka aasaasiga ah ee Waxbarashada Labada Luuqadood ee Ku Meelgaarka ah waa in lagu xaqiijiyo aqoon waayo-aragnimo ee xirfadaha iyo aqoonta tacliinta ee fasalka ku habboon iyo fududeynta geeddi-socodka barashada Ingiriiska iyada oo la adeegsanayo luuqadda guriga/aasaasiga ah. Fasallada iyo moodooyinka ENL, waxbarista ugu horreyn waa Ingiriis taageerada luuqadda aasaasiga ah/guriga waa la bixiyaa. Fadlan eeg shaxda ku taala bogga soo socda, taas oo isbarbardhigaysa moodooyinka barnaamijka ee kala duwan.

SU'AALAH INTA BADAN LA IS WAYDDIYO EE KU SAABSAN

BARTEYAASHA LUUQADDA INGIRIISKA (ELLs) (socota)

Barnaamijyada Labada Luuqadood	
Luuqadaha la isticmaaley	Guud ahaan 50% Ingiriis iyo 50%luuqadda guriga ama la beegsado ama 90% luuqadda guriga ama la beegsado iyo 10% Ingiriis, kaas oo kordha ilaa uu ka gaaro 50%-50%. (Boqolleyda way kala duwan tahay iyada oo ku xiran moodada barnaamijka.)
Yoolalka	Laba akhris-qoraalka iyo laba luuqadlenimada ee Ingiriiska iyo luuqadda guriga/labeegso

Barnaamijyada Waxbarashada Labada luuqadood ee Ku Meelgaarka ah	
Luuqadaha la isticmaaley	Isticmaalka luuqadda guriga/aasaasiga ah way yaraanaysaa inta uu isticmaalka Ingiriiska uu kordhaya
Yoolalka	Uisticmaal luuqadda guriga/aasaasiga ah si aad u sii wadid barashada maadooyinka adiga oo baranaya Ingiriis

Barnaamijka Ingiriiska Sida Luuqad Cusub AHaan	
Luuqadaha la isticmaaley	Ugu horreyn Ingiriis (Taageerada luuqadda guriga/aasaasiga ah ayaa la bixiyaa si loo fududeeyo barshada af Ingiriiska)
Yoolalka	In la taageero ELL-yada inta ay u horumarayaan dhanka si fiican u aqoonista Ingiriiska

Sideen ku baran karaa wax badan oo ku saabsan barnaamijyada ilmaheyga?

Gobolka New York, dugsiyada waxaa laga doonayaa in ay u qabtaan hanuuninta qoysaska ELL-yada dhowaan la qoray si loogu wargeliyo waalidiinta iyo mas'uuliyinka barnaamijyada ELL ee kala duwan ee laga heli karo dugsiyadooda ama degmada. Hanuuninta, waxaad ku helaysaa macluumaaad iyo qalabyo ku saabsan manhajka iyo heerarka, sidoo kale qalabka luuqadaada guriga/aasaasiga ee ku saabsan barnaamijyada, waxaadna awoodaysaa in aad wayddiiso su'aalo ku saabsan adeegyada ELL, oo leh caawimo laga helayo turjumaan, haddii loo baahan yahay. Dhammaadka hanuuninta, waxaad buuxinaysaa Liisto-hubineedka Hanuuninta Waalidka ELL si loo xaqijiyo in aad haysato macluumaadka loo baahan yahay si aad u gaarto go'aanada ilmahaaga. Waxaa siidheer, in aad sidoo kale helayo foomka Meelaynta Ardayda ELL ee kuu oggolaanaya in aad gaarto go'aanka ugu dambeeyaa ee ku saabsan adeegyada ilmahaaga uu helayo. Macluumaadkan waxaa lagu diyaarinayaa luuqadaada guriga/aasaasiga ah.

Goormee ayuu ilmaheyga ka bixi karaa barnaamihyada ELL?

Waxaa jirta afar siyaabo ee ELL-yada kaga bixi karaan xaalka ELL:

Fasallada K-12	Ka keenista heer Horreeya/Aqoon sare u leh NYSESLAT
Fasallada 3-8	Ka keenista heer Balballaarin/Horumarsan NYSESLAT iyo 3 ama ka badan qiimeynata Fanka Luuqadda Ingiriiska (ELA) isla sannadka
Fasallada 9-12	Ka keenista heer Balballaarin/Horumarsan NYSESLAT iyo 65 ama in ka badan Imtixaanka Ingiriiska ee Ku-meelgaarka ah isla sannadka
ELL-yada naafonimada leh	Hab qiimeyn beddiil ah ayaa la adeegsanayaa si loo go'aamiyo si fiican u aqoonista luuqad (sugaya in la oggolaado)

Marka ELL uu ka baxo xaalka ELL, asaga ama iyada waxay noqonayaan ELL hore. ELL-yada hore waxay xaq u leeyihiin in ay helaan laba sano oo ah adeegyada taageerada ELL hore.

QURAAFAADKA KU SAABSAN BARTEYAASHA LUUQADDA INGIRIISKA IYO BARTEYAASHA LUUQADDAHA BADAN (ELLs/MLLs)

Quraafaadka 1: ELL-yada badankooda waxay ku dhasheen dibadda Mareykanka (US).

Waxaa jira in badan 215,000 oo ah Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska (ELLs) oo ay da'doodu u dhaxeyso 5 ilaa 18 oo dhiganaya dugsi ku yaala Gobolka New York. Kuwaasi, 61.5% waxay ku dhasheen Mareykanka, iyada oo la eegayo Sistem-ka Kaydka Maclumaadka NYS 2013-2014 (SIRS).

Quraafaadka 2: Waagii hore, muhaajiriinta waxay guuleysteen la'aanta Ingiriiska Luuqad Cusub Ahaan (ENL) iyo fasallada labada luuqadood.

Noqoshada laba luuqadle waa qiime badan, iyada oo uu waqtiga isbeddelay. Ardayda waxay wajahaan suuqa shaqada ee u baahan guul waxbarasho aad u badan marka loo eego si walba. Qaadashada NYS ee heerarka Manhajka Midaysan ee ELA waxay u baahan tahay xirfadaha luuqadda oo heersare ah sidaa awgeed qalinjabiyeysaasha waxay noqon doonaan kuwo ku tartami kara dhaqaalaha caalamkeenna. Maadaama ELL-yada ay la yimaadaan aqoonta luuqadooda guriga/aasaasiga ah, bareyaasha waa in ay dhisaan aqoontooda hore si ay hore ugu sii horumariyaan aqoonta iyo xirfadaha tacliimeed ee ELL-yada iyo in ay u diyaariyaan kuleejka iyo xirfadda shaqo.

Quraafaadka 3: Marka ELL-yada ay bulsho ahaan ugu hadli karaan Ingiriiska, waxay markaasi awoodaan in ay tacliin ahaan ugu guulaystaan Ingiriiska.

Iyada ELL-yada ay ku baran karaan luuqadda bulshada saddex sano gudahooda, waxay ku qaadan kartaa ilaa toddobo sano in ELL uu ku guuleysto si fiican u aqoonista tacliimeed ee Ingiriiska. Heerarka aqoonta iyo akhris-qoraalka ee luuqadda aasaasiga/guriga waxay saameeyaan heerka ee ardaydu ay wax uga qaban karaan tacliin ahaan Ingiriiska.

Quraafaadka 4: Ka gudbidda imtixaanka si fiican u aqoonista Ingiriiska sida Imtixaanka Aqoonsiga NYS ee loogu talogalay Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska (NYSITELL) ama Imtixaanka Guusha Ingiriiska Sida Luuqadda Labaad Ahaan ee NYS (NYSESLAT) waxaa loola jeedaa in ardayga uu si ku filan aqoon sare ugu leeyahay Ingiriiska si uu ugu guuleysto dugsiga.

Ardayda aqoonta sare u leh Ingiriiska waxay wali ugu baahan karaan taageero iyo gargaar iyo/ama taageeri waxbaris fasalka. Qaypta 154 ee Xeer-hoosaayada Guddoomiyaha waxay ugu baahan tahay degmooyinka dugsiga in ay siyaan ardayda leh adeegyada ELL hore laba sano kadib marka ay ka soo baxaan xaalka ELL. Waxaa siidheer, waxay sii-wadi karaan in ay helaan diyaafadinta imtixaanka ELL isla labada sano kadib marka ay ka baaan ELL-yada.

Quraafaadka 5: Si ay ugu guuleystaan dugsiga, ELL-yada waa in ay dhaqan ahaan ku Darsamaan ardayda kale, sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalca ah.

Beddelkii ay "ka quusan lahaayeen ka faa'iideysiga," ELL-yada waxay u baahan yihiin in ay la xiriiriyaan waxa ka dhacay fasalladooda waayo-aragnimadooda dhaqanka sidaa darteed waxay joogteyn karaan sharftooda iyaga oo baranaya dhaqan cusub. Sida dhammaan ardayda, macalamiinta waa in ay dhisaan aqoonta hore ee ardayga. Qirista waayo-aragnimada dhaqanka ee kala duwan ee fasalka waxay kordhinaysaa tayada waxbarashada ee dhammaan ardayda.

Quraafaadka 6: Haddii carruurta loogu soo bandhigo Ingiriis iyo luuqadooda aasaasiga ah guriga, waxay u horseedaysaa nidaamdarro luuqadeed iyo dib-u dhac.

Maya, uma horseedayso nidaamdarro luuqadeed iyo dib-u dhac. Waxaa aad muhiim u ah in waalidiinta ay kula hadlaan luuqadda ay sida fasiixa ah u yaqaanaan carruurtooda. Maskaxda aadanaha waxay leedahay awood ballaaran oo ay ku baran karto luuqado badan isku mar. Xaqiqdii, barashada laba luuqadood waqtii hore waxay xoojinaysaa awoodaha garashada. Noqonshada laba luuqadle waxay sidoo kale kordhinaysaa faa'iidooyinka tacliimeed iyo midda dhaqaale ee caalamkeenna dhaqaalahay.

QURAFAAADKA KU SAABSAN BARTEYAASHA LUUQADDA INGIRIISKA IYO BARTEYAASHA LUUQADAHA BADAN (ELLs/MLLs) (socota)

Quraafaaad 7: Ardayda waa in laga niyad-jabiya in ay ku adeegsadaan luuqadooda guriga/aasaasiga ah hugsiga.

Dugsiyada ardayda lagu dhiirrigeliyo in ay adeegsadaan luuqadooda guriga/aasaasiga ah waxay taageertaa barashada ardayga iyada oo kordhisa ka-qaybgalka ardayga. Habdhaqankan sidoo kale waxay si fiican u taageertaa isla-hanwaynaan.

Quraafaaad 8: Dhengalka Ingiriiska waxay sababeyso barashada luuqadda Ingiriiska oo degdeg ah.

Waxbarista luuqadda guriga/aasaasiga ah ee ardayga waxay fududeynaysaa barashada Af Ingiriiska. Carruurta waxay u baahan yihiin aasaas adag, oo fasiix ah ee luuqadooda koowaad si ay ugu guulaystaan Ingiriiska. Barnaamijyada labada luuqadood waxay bixiyaan hab waxbaris wax-ku-ool ah ee taageera barashada luuqad labaad iyo aqoonta maadooyinka, waxayna ilaalinaysaa luuqadda aasaasiga/guriga ee ilmaha.

Quraafaaad 9: ELL-yada waa in la baro akhriska Ingiriiska bilowga.

Cilmi-baaris ayaa muujinaysa in xirfadaha akhriska ay ugu gudbaan hal luuqad luuqad kale. Ardayda marka hore barta akhristka luuqadooda guriga/aasaasiga ah waxay noqonayaan akhristeyaasha guulaysta ee Ingiriiska.

Waxaa laga soo qaatey: *Debunking the Myths of English Language Learners*, New York State United Teachers Research and Educational Services, 2015.



MIYAAD OGEYD? XAQIIQOYINKA KU SAABSAN LABA LUUQADLENIMADA IYO WAXBARASHADA LABADA LUUQADOOD

Kuwan soo socda waa xaqiiqooyin muhiim ah oo ku saleysan cilmi-baaris oo ku saabsan labada luuqadlenimada iyo waxbarashada labada luuqadood. Waxaa jira faa'iido badan ee ah garashada, bulshada iyo xirfadlenimo ee ay leedahay laba luuqadlenimada:

- Caddaynta laga helay tiro daraasado ah ayaa soo jeedinaya in laba luuqadlenimada ay wanaajinayso shaqaynta maskaxda ah meel badan ee ka mas'uulka ah qorsheynta, xallinta dhibaatooyinka, iyo qabashada hawlo taxane ah oo u baahan maskax.
- Ardayda labada luuqadlayasha ah waxaa la ogaaday in ay leeyihiiin awood badan oo ay kula soconayaan deegaanka iyo in ay feejignaadaan.
- Waxbarashada labada luuqadood waxay tixgelinaysaa habdhaqano kala duwan waxayna ku kobcinaysaa horumarinta bulshada ardayda oo dhan.
- Ardayda barnaamijyada labada luuqadood waxay leeyihii dareenka adag ee aqoonsigooda iuo liiqadooda; sidaa darteed dhaqankooda waa la matilayaa oo waa la xushmeynayaa.
- Laba luuqadlenimada waa qiime xirfadeed. Bulshada caalamka ee sii kordhaysa, awoodda loogu hadlayso oo lagu qorayo dhawr luuqadood waxaa si aad ah loogu qiimeeyaa suuqa shaqada.
- Ugu akhrinta ilmahaaga luuqadaada aasaasiga/guriga waa habdhaqan akhris-qoraal wax-ku-ool ah oo cajiibna ah ee ku leh saameyn fiican oo badan horumarinta tacliintiisa ama tacliinteeda.

Akaademyada Mareykanka ee Cudurada Carruurta * waxay dhowaan ayiday warbixinta siyaasadda arrimaha bulsho ee ku saabsan carruurta luuqadaha badan ee ku qoran isku jirka ugu dambeeya ee cilmi-barista, oo ku saleysan caddaynta ballaaran ee majaalada caafimaadka, cilmi-nafsi, waxbarashada, iyo luuqad yaqaanada. Warbixinta waxay ku soo gunaanadeysaa in luuqado badan garashada ay tahay faa'iido la kobcinayo iyo in aysan ahayn cunsur halis oo lagu niyadjabinayo nolosha ilmaha. Hadaad rabto macluumaad badan eeg: <http://pediatrics.aappublications.org/content/133/5/e1481.full>

* Online-ka lagu soo daabacay Abril 28, 2014. *Pediatrics* Vol. 133, No. 5, Maajo 1, 2014.



MIYAAD OGEYD? XAQIIQOYINKA KU SAABSAN LABA LUUQADLENIMADA IYO WAXBARASHADA LABADA LUUQADOOD (sii-socota)

Quraafaad 1: Ilmaheyga wuxuu ku jahwareeraya laba luuqadood.

- Isku mar barashada laba luuqadood ama in ka badan ma jahwareeriso carruurta. Carruurta lagu soo barbaariyey meel labada luuqadoodba lagu qiimeeyo waxay dareemayaan faa'iido garasho, bulsho iyo faa'iido dhaqaale suurtagal ah.
- Carruurta loo soo bandhigo in ka badan hal luuqad waxay ku leeyihin cuf nudayaal badan meelaha maskaxda ee la xiriira luuqadda, xasuusta, iyo niyadda.
- Carruurta luuqadaha badan waxay leeyihin kantaroolka fulinta oo badan (ee ku caawinaya qorsheynta, xifdinta, la tacaalidda xaaladaha curista ama cusub, iyo caabbinta damaca) iyo xirfadaha akhris-qoraalka waqtiga hore oo fiican.

Quraafaad 2: Carruurta labada luuqdood ee isku qasa erezada waxay leeyihin xirfado luuqadood oo dacif ah.

- Carruurta labada luuqadood ee "isku qasa luuqadaha" ma aha kuwo dhiman, balse ay keliya adeegsanayaan dhammaan khayraadkooda luuqadeed. Horumarinta luuqadeed waa geeddi-socod dhaqdhaqaaq leh ee tixgeliya labada luuqadoodba. Khayraadka ugu awood badan ee ay leeyihin ELL-yada waa luuqadooda guriga/aasaasiga ah, waxayna u badan tahay in ay leeyihin inta ay baranayaan Ingiriis.

Quraafaad 3: Ilmaheyga ma baranayo Ingiriis haddii asaga ama iyada ay si joogto ah ay ugu bandhigamaan luuqad kale.

- Cilmi-baarlis ayaa sheegtay in habka ugu fiican ee lagu horumarinayo luuqad labaad waa iyada oo loo marayo isticmaalka luuqadda koowaad. Ardayda waxay si fiican u fahmayaan barnamijyada labada luuqadood inta ay noqonayaan laba luuqadlayaal oo ayna ka helayaan taageerada ay uga baahan yihiin macalaminta sida fiican u qalabeysan iyo bareyaasha si ay ugu guulaystaan labada luuqadood.

Quraafaad 4: Ilmaheyga waxay si dhaqso ah u baranayaan Ingiriis haddii asaga ama iyada ay kaliya u bandhigamaan Ingiriis.

- Cilmi-baarista waxay sheegtay in ardayda la baro luuqadda guriga/aasaasiga ah in ay Ingiriiska si dhaqso ah u bartaan. Aqoonta laga helay luuqadda guriga/aasaasiga ah waxay u wareegaysaa luuqad kale. Xaqiiqdii, barashada akhrinta luuqadda koowaad waxay boorinaysaa heerarka sare ee guusha akhrinta ee Ingiriiska! (Warbixinta National Reading Panel: Teaching Children to Read, 2006.)

Waxaa jira faa'iidooyin badan oo ay leedahay laba luuqadlenimada, iyo sida uu sheegay wargayska *York Times*, "noqoshada laba luuqadle waxay ka dhigaysaa dadka kuwa aqli badan." (*Why Bilinguals are Smarter*, NYT, 2012)

Bogga 2-4, waxaad helaysaa macluumaad qoto-dheer oo ku saabsan mid kastoo ah moodooyinka barnamijka ee uu gobolka New York siiyo ELL-yada.

KA-QAYBGALKA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

Sidee anaga waalidiin/mas'uuliyiin ahaan u taageeri karnaa carruurteenna?

- U akhri ilmahaaga luuqadiisa guriga/aasaasiga ah iyo/ama Ingiriiska. Cilmi-baaris ayaa tilmaameysa in u akhrinta ilmahaaga luuqadaada guriga/aasaasiga ah ay ku caawin doonto taageerada xirfadaha akhris-qroaalka Ingiriiska.
- Usheeg sheekooyin ilmahaaga oo luuqadaada guriga/aasaasiga ah. Kala hadal carruurnimadaada ama waxyaabo aad ka xasusato wax la soo dhaafey.
- Tusi ilmahaaga in aad qiimeyso luuqadaada guriga/aasaasiga ah. Kula hadal asaga ama iyada luuqadaas xataa haddii asaga ama iyada ay ku jawaabaan Ingiriis.
- U raadi kaarka maktabadda ilmahaaga, aad maktabadda, kadibna soo amaaho buugaag Ingiriis ah ama luuqadaada guriga/aasaasiga ah, haddii la heli karo.
- Hubso in aad ka soo qaybgasho shirarka waalidka-macalinka ee uu jadwaleeyay dugsigaaga.
- La jadwalee kulan shaqsi macalinka ilmahaaga si aad wax uga barato siyaabaha gaarka ah ee aad ku caawin karto ilmahaaga in uu guulaysto.
- U jadwalee waqtii ilmahaaga maalin kasta si uu u sameeyo shaqi guriga iyo, haddii ay suurtagal tahay, u diyaari goob degan, oo aan lahayn ka dhixgalis, halkas oo uu asaga ama iyada ka shaqeeyn karaan.
- Qorshee maalin-joog uu qoyska tamashleyn ku tagayo matxafyo. Hageyaasha jooga matxafka waxay kugu caawin karaan in ay ku hagaan soo-bandhiga ilmahaaga. Waxaa siidheer, matxafyada inta badan waxay bixiyaan fasallo tayo kordhin jaban iyo/ama bilaash ah kadib dugsiga ama ayaamaha fasaxa toddobaadka.
- Mareykanka, waalidiinta waa qayb lagama maarmaan u ah nidaamka waxbarasho. Wayddii macalinka sida aad uga qaybgali kartid.
- Ogow xuquuqdaada. [Fadlan eeg Sharciga Xuquuqda Waalidiinta ee Barteyaasha Luugadda Ingiriiska ee Gobolka New York.](#)



Colorín Colorado

Mareegto laba luuqadle oo loogu talogalay waalidinta iyo bareyaasha Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska oo ah mashruuc ay wadaagaan Ururka Macalaminta ee Mareykanka (*American Federation of Teachers (AFT)*). Waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan barista Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska.

<http://www.colorincolorado.org/>

Engage NY

EngageNY.org waxaa sameeyay oo suurtogaliyey Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (NYSED) si ay u taageerto hirgalinta arrimaha muhiimka ah ee Ajeendaha Dib-u Habynta Ku Meelgaarka ah ee Guddiga Gobolka New York State. EngageNY.org waxaa ka go'an siinta bareyaasha Gobolka New York oo dhan waqtii dhabin, qalabyada barashada xirfadeed iyo khayraadka lagu taageerayo bareyaasha gaaridda himilada Gobolka ee waxbarashada u diyaarsanaanta kuleejka iyo xirfadda shaqo ee dhammaan ardayda.

<https://www.engageny.org/>

National Clearinghouse for Bilingual Education: *If Your Child Learns in Two Languages* (buugyare)

http://nclala.us/files/uploads/9/IfYourChildLearnsInTwoLangs_English.pdf

National PTA: Parents' Guide to Student Success

<http://www.pta.org/parents/content.cfm?ItemNumber=2583>

NYC DOE: ELL Family Resources

<http://schools.nyc.gov/Academics/ELL/FamilyResources/Activities+For+Parents.htm>

<http://schools.nyc.gov/Academics/ELL/FamilyResources/default.htm>

New York State Education Department Office of Bilingual Education and World Languages

<http://www.p12.nysed.gov/biling/>

New York Immigration Coalition Directory of Service Providers

http://www.thenyic.org/sites/default/files/Low_Cost_Immigration_Service_Providers_Final_Draft_6.15.15_0.pdf

PBS Kids

<http://pbskids.org/>

Reading Rockets: English Language Learners

<http://www.readingrockets.org/reading-topics/english-language-learners>

Teachers First: Ideas and Resources for Parents of ESL/ELL Students

<http://www.teachersfirst.com/par-esl.cfm>

The Teaching of Language Arts to Limited English Proficient/ English Language Learners:

Learning Standards for Native Language Arts

<http://www.p12.nysed.gov/biling/resource/NLA.html>

US Department of Education

<http://www.ed.gov/>

USDOE Federal Student Aid Portal

<https://studentaid.ed.gov/sa/resources/parents>

USDOE Helping My Child Succeed: Toolkit for Hispanic Families (English and Spanish)

<http://www2.ed.gov/parents/academic/involve/2006toolkit/index.html>

USDOE Helping Your Child Series (English and Spanish)

<http://www2.ed.gov/parents/academic/help/hyc.html>

**Waalidiinta haysta macluumaad waa kuwa ugu fiican
ee u doodi kara carruurtooda.**

Hadaad qabta su'aalo iyo walaac ku saabsan adeegyada ELL fadlan la xiriir:

nysparenthotline@nyu.edu

(800) 469-8224



Hadaad qabto su'aalo, fadlan booqo:
Office of Bilingual Education and World Languages (OBEWL)
<http://www.p12.nysed.gov/biling/>

Prepared by the New York State Education Department, Office of Bilingual Education & World Languages
in collaboration with CUNY-New York State Initiative on Emergent Bilinguals (NYSIEB).
Special thanks to Dr. Carmina Makar and Dr. Dina López.